

JAMHUURIYADA SOMALILAND



Tix: KDQ/XK/540/08

*Taar: June 9, 2008
Hargaysa*

HESHIISHKA WADAHADALLADII 13^{KII} MAY – 1^{DII} JUUNE 2008 EE XUKUUMADA IYO LABA XISBI MUCAARID EE JSL:

Wadahadalladii isdabjooga ahaa ee Xukuumadda iyo labada Xisbi mucaarid ee JSL billaabmay 13^{kii} May ilaa 1^{dii} Juune 2008, ayaa doodo dhaadheer, lafagurid iyo isu-tanaasul badan oo ay ku dheehantahay wadaniyad, masuuliyad dadka iyo dalkaba ugu damqanayaan, kadib, ay haddii Illaahay idmo isla gaadheen qodobadan go'aan ee soo socda:

1. In dib loo dhigo Doorshada Golayaasha Degaanka oo la soo hormariyo Doorashada Madaxtooyada.
2. In Diiwaangelinta la siiyo wakhti ku filan oo ah sabobta dib loogu dhigay Doorashooyinka Golayaasha Degaanka.
3. In Komishanka Doorashooyinka Qaranku soo diyaariyo jedwalka mudaysan ee diiwaangelinta iyo Doorashada Madaxtooyada
4. In Doorashda Madaxtooyadu ay ka soo hormarto Lixda Bisha April 2009 (06/04/2009).
5. In qodobada Xeerka Diiwaangelinta ee aan la jaanqaadi Karin Diiwaangelintan iyo Doorashada Madaxtooyada la laalo.

6. Haddii ay yimaadaan Duruufo lama filaan ah oo dib u dhigi kara qabsoomida Doorashada Madaxtooyada, waxaa xaaladdaas wada jir uga go'aan qaadanaya Komiishanka Doorashooyinka iyo Saddexda Xisbi Qaran, iyadoo Golaha Guurtiduna u ansixinayo wakhtiga ay isla garteen oo aan waxba lagu darin.

7. In Xukuumadda iyo Xisbiyada Mucaaridka ahi ay yeeshaan, isku xidhnaan iyo wada tashi joogta ah.

8. In Guddida Farsamo ee saddexda Xisbi Qaran ay noqoto Guddi Joogto ah, una xilsaaran kalsooni-dhiska Xukuumadda iyo Xisbiyada wada shaqeyntooda. (F.G Arag lifaaqa is fasiraya ee Waajibaadka shaqo ee Guddida heer Qaran).

Wa Billaahi tawiiq

1. Xisbiga UDUB

Ahmed Yuusuf Yaasin
Madaxweyne Ku-xigeenka JSL
Ahna Gudoomiye ku-xigeenka Xisbiga UDUB



2. Xisbiga KULMIYE

Muuse Biixi Cabdi
Gudoomiye ku-Xigeenka Xisbiga KULMIYE



3. Xisbiga UCID

Faysal Cali Farah
Gudoomiye Xisbiga UCID



4. Komiishanka Doorashooyinka

Maxamed Ismaaciil Maxamed
Gudoomiyaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka



Iyadoo laga duulayo heshiiskii Xukumada iyo labada Xisbi Qaran ee Mucaaridka ahi ay gaadheen maalintii Taariikhdu ahayd 01/06/08 qodobkiisa siddedaad.

Iyadoo la tixgelinayo Xeerka Doorashooyinka Dawladaha Hoose iyo Madaxtooyada ee Xeer Lr. 20/2001.

Markii la xeeriyey baahida loo qabo isku-xidhnaanta iyo wada shaqaynta saddexda Xisbi Qaran, siiba marxaladda lagu jiro hawlgalka Diiwaangelinta iyo Doorashooyinka.

Markii la dersey nuxurka ku faahfaahsan Xeerka hab-dhaqanka Xisbiyada Siyaasadeed ee soo baxay 2005 (Code of Conduct) qaybtiisa saddexaad.

Waxa lama huraan loo arkay in Guddida Farsamo ee ka koobnayd saddexda Xisbi Qaran loo Xilsaaro dhawrista iyo ku-dhaqanka anshaxa wanaagsan iyo asluubta wacan ee lagu maamulayo Diiwaangelinta iyo Doorashooyinka,.

Hawlaha Guddiga Farsamada ee saddexda Xisbi Qaran waa la joogteeyey iyagoo si buuxda u hawlgelaya maalinta saddexda Guddoomiye Xisbi wadajir u saxeexaan heshiiska guud ee heer qaran.

Guddiga Farsamo waxay ka hawl-geleysaa:

1. Ku-fara-adayga heshiiskii wadareed iyo jawiga is-afgarad ee heshiiska lagu gaadhay.
2. Ilaalinta u-sinnaanshaha hantida Qaranka sida maaliyada, gaadiidka, warbaahinta, isticmaalka awoodda dawladeed IWM.
3. Hubinta inaan Wasiir ama Sarkaal dawladeed u isticmaalin awoodiisa Qaran olale siyaasadeed oo u adeegaya Xisbi gaar ah xilliyada Diiwaangelinta iyo Doorashooyinka.
4. Gacan-ka-geysashada habsami-u-socodka hawlaha Diiwaangelinta iyo Doorashooyinka.
5. Hubinta iyo Xaqiijinta dhaqan-galka heshiiskii saddexda Xisbi Qaran.
6. Dhawrista iyo Ilaalinta Xasilloonida dalka iyo xuquuqda muwaadinka.
7. U-gogol-xaadhka kulanka saddexda Gudoomiye Xisbi markay baahideedu muuqato.
8. U-tooggo-haynta hagaajinta sumcadda wanaagsan ee looga baahan yahay geeddi-socodka hannaanka dimuqraadiyada.

Guddidan oo hawlgalkeeda lagu meel-arinayo wareegto Madaxweyne, waxay ka kooban tahay sagaalka Xubnood ee ka kala socda saddexda Xisbi Qaran, Magacyadooduna qoraalkan ku lifaaqan yihiin.

Alla Mahad Leh

Waxa soo diyaariyey:

1. Maxamed Ismaaciil Bulaale
Xoghayaha Guud ee Xisbiga UDUB

2. Maxamed Axmed Xasan
Xoghayaha Guud ee Xisbiga UCID

3. Axmed Xaaji Cali Cadami
Gudoomiyaha Guddida Xisbiga Kulmiye ee Arrimaha
Komiishanka.